War-saxaafadeed

U diyaar garowga qeybinta tallaalka KOOFID-19 ee Alberta

Disambar 02, 2020

Dowlada Alberta waxay si buuxda ugu diyaar garowday inay hesho oo ay qaybiso tallaalada KOOFID-19 ilaa 435,000 Albertans ayaa lasiin doonaa talaal rubaca koowaad ee sanadka 2021.

Qorshaynta iyo u diyaar garawga waa horumarsan yihiin. Alberta waxay ku jirtaa booska ugu sareysa si ay u hirgaliso barnaamijka talaalka wejigiisa isla marka talaalada la helo.

Si loo taageero shaqadan socota, dowladda Alberta waxay magacawday guddi cusub oo loo yaqaan 'SHAQO GALINTA TALLAALK KOOFID-19 (Covid-19 Vaccine Task Force)'. Waxaa gudoomiye ka ah wasiir ku xigeenka wasaarada dawlada hoose, shaqo kafariiste Gaashaanle Dhexe (Lt.-Gen.) Paul Wynnyk, SHAQO GALINTA TALLAALK KOOFID-19 (COVID-19 Task Force Task Force) wuxuu ku dhisi doonaa talaabooyinka ay Caafimaadka Alberta iyo Adeega Caafimaadka horeyba u qaadeen si ay ugu diyaar garoobaan gaarsiinta talaalka.

“Alberta waxay diyaar u tahay inay soo saarto tallaal naf-badbaadin ah laga bilaabo Maalinta 1aad. Waxaan leenahay qorshe si wanaagsan loo soo saaray, oo ka bilaabmaya tallaalka kuwa ugu nugul. Dadaalladeenna waxaa hoggaaminaya taliyihii hore ee Ciidanka Kanada, iyadoo ay talo naga siinayaan khubarada ugu sareysa caafimaadka bulshada.”
Jason Kenney, Gudoomiyaha

Kooxda shaqo galinta ayaa kormeeri doonta hirgelinta barnaamijka bixinta tallaalka ee gobolka si loo hubiyo anshaxa, waqtiga iyo wax ku oolka ah ee loogu tallaalayo tallaalada guud ahaan Alberta.

“Waxaan hirgalinay talaabooyin adag oo bartilmaameed ah oo lagama maarmaan u ah joojinta faafitaanka KOOFID-19, iyadoo la qorsheynayo helitaanka talaal badbaado leh oo wax ku ool ah markey diyaar noqdaan. Guddigaan cusub ee howsha wada ayaa dhisi doona shaqadii balaarneyd ee ay saraakiisha caafimaadka qabteen si loo hubiyo in reer Alberta ay u helaan talaal sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah, marka talaal la helo.”
Tyler Shandro, Wasiirka Caafimaadka

Xogta la xiriirta

Xogta COVID-19 ee loogu talagalay reer Alberta
COVID-19 info for Albertans

Weydiimaha warbaahinta

Tom McMillan
780-422-4905
Kaaliyaha Agaasimaha Isgaarsiinta, Caafimaadka

War-saxaafadeed

Xilligan, ma jiraan wax tallaal ah oo loo yaqaan 'KOOFID-19' oo ay oggolaatay Caafimaadka Kanada (Health Canada). Markii la ansixiyo, Alberta waxay rajeyneysaa inay hesho qiyaaso ku filan oo ah tallaalada Bifise (Pfizer) iyo Moderna si ay marka hore u tallaasho ilaa 435,000 reer Alberta oo ugu khatarta badan, inta u dhexeysa Janaayo iyo Maarso 2021.

“Waxaan sameyn doonnaa wax kasta oo suurtagal ah si aan u hubino in mar haddii tallaalka uu soo gaaro Alberta, loona qaybiyo sida ugu dhakhsiyaha badan uguna hufan ee suurtogalka ah. Waxaan u xilsaaraynaa koox farsamo yaqaanno kala duwan, oo laga soo xulay guud ahaan adeegga bulshada, si gaar ah diiradda loo saaro arrintan. ”
Paul Wynnyk, gudoomiye, Guddiga Shaqo Galinta Tallaalka KOOFID-19

Tallaalka wuxuu lahaan doonaa wajiyo, laga bilaabo wajiga 1aad horraanta Janaayo, marka tallaallada la helo. Kuwa lagu tallaalayo wajiga 1aad waxaa ka mid ah xaumaha daryeelka muddada dheer iyo deggeneyaasha adeega loo fidiyo ee deggan iyo shaqaalaha xarumahaas ka tirsan, dadka xeryaha Dadkii Hore (First Nations) ee da'doodu ka weyn tahay 65, waayeelka 75 jir iyo wixii ka weyn, iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee aadka loogu baahan yahay si loo hubiyo awoodda shaqaale iyo cidda ay u badan tahay inay u gudbiyaan KOOFID-19 ee halista ugu badan ku jira.

Wejiga 2aad waxaa la filayaa inuu bilaabmo Abriil 2021 waxaana mar kale lagu bartilmaameedsanayaa dadka mudnaanta la siinayo. Wejiga 3 wuxuu ku lug yeelan doonaa in tallaalada loo fidiyo guud ahaan dadweynaha Alberta, oo la filayo inay bilaabmaan dayrta 2021.

Marxaladihii hore ee cudurka, Xarunta Hawlgallada ee Gobolka, oo uu hogaaminayo Wynnyk, waxay qayb ka ahayd wada shaqeyn guul leh oo lala yeeshay Adeegyada Caafimaadka ee Alberta si loo soo iibiyo loona qaybiyo maaskarada, goonnada, galoofyada iyo gaashaammada wejiga iyadoo lagu guda jiro degdeg caalami ah oo loogu talagalay qalabka ilaalinta shakhsiyeed (PPE).

Xubnaha Guddiga Shaqo Galinta Tallaalka KOOFID-19 waxaa ku jiri doona khabiir ka tirsan dowlada oo dhanka howlgalada iyo saadka ah, xiriirka dowlada dhexe iyo gobolada, caafimaadka iyo goobaha caafimaadka, caafimaadka bulshada iyo talaalka, anshaxa iyo teknolojiyada macluumaadka iyo xogta.

Xaqiiqooyin deg deg ah

- Alberta waxay si dhow ula shaqeysay dowlada federaalka iyo gobolada iyo deegaanada kale si loo soo iibiyo talaalka KOOFID-19 ilaa iyo markii uu faafay.
- Hadda ma jiraan wax tallaal oo KOOFID-19 ah ay ansaxisay Caafimaadka Kanada (Health Canada).
- Waqtigaan, Alberta waxaa loo qoondeeyay qiyaaso labo talaal ah, kuwaas oo lafilayo inay bilaabaan imaatinka horaanta 2021 hadii ay ansaxiso Caafimaadka Kanada (Health Canada).

War-saxaafadeed

- Alberta waxay rajeyneysaa inay hesho qiyaasta tallaalka Bifser (Pfizer) laga bilaabo bilowga 2021, oo ay ku xigto qiyaaso tallaalka Moderna ah.
- Qaddarka saxda ah iyo muddooyinka ayaa wali la dhameystirayaa.
- Labada tallaalbo waxaa la filayaa inay la yimaadaan shixnado badan inta lagu jiro rubuca hore ee 2021.
- Shixnad dheeri ah oo tallaal ah ayaa la filayaa dhammaadka 2021 maaddaama waxsoosaarka adduunka uu sii kordhayo.